**Submission of Documentation:** The time period to submit documentation is 14 business days from the date that you receive a written request from your housing provider asking that you provide documentation of the occurrence of domestic violence, dating violence, sexual assault, or stalking. Your housing provider may, but is not required to, extend the time period to submit the documentation, if you request an extension of the time period. If the requested information is not received within 14 business days of when you received the request for the documentation, or any extension of the date provided by your housing provider, your housing provider does not need to grant you any of the VAWA protections. Distribution or issuance of this form does not serve as a written request for certification.

**Confidentiality:** All information provided to your housing provider concerning the incident(s) of domestic violence, dating violence, sexual assault, or stalking shall be kept confidential and such details shall not be entered into any shared database. Employees of your housing provider are not to have access to these details unless to grant or deny VAWA protections to you, and such employees may not disclose this information to any other entity or individual, except to the extent that disclosure is: (i) consented to by you in writing in a time-limited release; (ii) required for use in an eviction proceeding or hearing regarding termination of assistance; or (iii) otherwise required by applicable law.

**TO BE COMPLETED BY OR ON BEHALF OF THE VICTIM OF DOMESTIC VIOLENCE, DATING VIOLENCE, SEXUAL ASSAULT, OR STALKING**

1. Date the written request is received by victim: \_\_\_\_\_

2. Name of victim: \_\_\_\_\_

3. Your name (if different from victim's): \_\_\_\_\_

4. Name(s) of other family member(s) listed on the lease: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

5. Residence of victim: \_\_\_\_\_

6. Name of the accused perpetrator (if known and can be safely disclosed): \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

7. Relationship of the accused perpetrator to the victim: \_\_\_\_\_

8. Date(s) and times(s) of incident(s) (if known): \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

10. Location of incident(s): \_\_\_\_\_

<p>In your own words, briefly describe the incident(s):</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p>
---

This is to certify that the information provided on this form is true and correct to the best of my knowledge and recollection, and that the individual named above in Item 2 is or has been a victim of domestic violence, dating violence, sexual assault, or stalking. I acknowledge that submission of false information could jeopardize program eligibility and could be the basis for denial of admission, termination of assistance, or eviction.

Signature \_\_\_\_\_ Signed on (Date) \_\_\_\_\_

**Public Reporting Burden:** The public reporting burden for this collection of information is estimated to average 1 hour per response. This includes the time for collecting, reviewing, and reporting the data. The information provided is to be used by the housing provider to request certification that the applicant or tenant is a victim of domestic violence, dating violence, sexual assault, or stalking. The information is subject to the confidentiality requirements of VAWA. This agency may not collect this information, and you are not required to complete this form, unless it displays a currently valid Office of Management and Budget control number.



## **Faribault Housing and Redevelopment Authority/Robinwood Manor Apartments<sup>1</sup>**

**Ogeysiinta Xaquuqda Daganaanshaha sida waafaqsan Xeerka Xadgudubka Kadhanka ah**

### **Dumarka<sup>2</sup>**

#### **Ee ku socoto dhammaan Kireystayaasha iyo Codsadayaasha**

Xeerka Xadgudubka Kadhanka ah Dumarka (VAWA) waxuu difaaca dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalida. VAWA madifaaco kaliya dumarka, laakin waxuu si simman udifaaca dhammaan shaqsiyaadka yadoo aan laga eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiga, ama dooqa galmada.<sup>3</sup> Waaxda Guriyeynta iyo Hormarinta Magaalada ee Mareykanka (HUD) waa hay'ad Faderaali ah oo kormeerta in **project-based Section 8/Robinwood Manor Apartments** ay u hogaansantahay VAWA. Ogeysiintaan waxay sharaxdaa xaquuqahaaga sida waafaqsan VAWA. Foomka xaqiijinta ansixinta HUD wuxuu ku lifaaqanyahay ogeysiintaan. Waxaad buuxin kartaa foomkaan si aad u muujisid inaad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, iyo inaad rabtid inaad ku isticmaashid xaquuqdaada sida waafaqsan VAWA.

#### **Illaalada Codsadayaasha**

Haddii aad u qalantid dhanka kale caawinta quseyso **project-based Section 8/Robinwood**

**Manor Apartments**, laguuma diido karo ogolaanshaha ama laguuma diidi karo caawinta

sababtoo ah waxaad

---

<sup>1</sup> Ogeysiinta waxay isticmaashaa HP ee bixiyaha guriga laakin bixiyaha guriga waa inuu geliyaa magceeda halka HP loo isticmaalo. Aqoonsiga sharuudaha barnaamijka xeerarka gaarka ah ee shaqsiya ama masuulka bixinayo ogeysiinta xaquuqda danagaanshaha.

<sup>2</sup> Inkastoo uu jiro magaca sharcigaan, illaalada VAWA waxaa loo heli karaa iyada oo aan laga eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiyada, ama dooqa galmada.

<sup>3</sup> Bixiyayaasha guryahay kuma takoori karaan si ku saleysan sifo walboo illaalsan, oo ay ku jiraan jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, diinta, jinsiga, heerka qoyska, curyaannimada, ama da'da. Guryaha HUD-caawisay oo ku caymisan HUD waa in loo diyaariyaa dhammaan shaqsiyaadka u qalmo ee aan laga eegin dooqa galmada dhabta ama dooqa galmada loo gartay, aqoonsiga jinsiga, ama heerka gurka.

tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

### **Illaalada Kireystayaasha**

Haddii aad heleysid caawinta waafaqsan **project-based Section 8/Robinwood Manor**

**Apartments**, waxaa laga yaabaa inaan lagu diidin caawinta, laga joojin ka qeybqaadashada, ama laga saarin gurigaaga kirada ah sababtoo ah waxaad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Sidoo kale, haddii adiga ama shaqsi xariir kula leh uu yahay ama ahaa dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ee xubinta qoyskaaga ama marti kale, laga yaabo inaan lagu diidin caawinta kirada ama xaquuqaha daganaanshaha sida waafaqsan **project-based Section 8/Robinwood Manor Apartments** kaliya sida ku saleysan howsha dambiga ee sida tooska ah ula xiriirto rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Shaqsigu xariirka kula leh waxaa laga wadaa xaaskaaga, waalidka, walaalka, walaasha, ama canuga, ama qofka taagan meesha waalidka ama masuulka (tusaale ahaan, shaqsigu ku raacsan ee daryeelkaaga ku jiro, haynta, ama maamulida); ama shaqsi walba, kireyste, ama shaqada sharci darada ee ku nool qoyskaaga.

### **Ka saarida Xad gudbaha ama Dambiihaha Qoyska**

HP laga yaabo inay kala jaraan (kalaga goyn) heshiiskaaga si markaas looga saaro shaqsigu ama looga joojiyo caawinta shaqsigu ka qeybgalay howsha dambiga (ku xadgudbaha ama dambiihaha) sida tooska ah ula xiriirto rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Haddii HP at doortaan in laga saaro ku xadgudbaha ama dambiilaha, HP laga yaabo inaysan ka qaadin xaquuqda kireystayaasha u qalmo qeybta ama haddii kale la ciqaabo kireystayaasha haray. Haddii ku xadgudbaha laga saaray ama dambiilaha uu ahaa kireystaha kaliya ee la aasaasay u qalmida caawinta waafaqsan barnaamijka, HP waa inay u ogolaataa kireystaha ah ama ahaa dhibanaha iyo xubnaha kale ee qoyska inay ku haraan qeybta oo muddo waqti ah, si markaas loo aasaaso u qalmida sida waafaqsan barnaamijka ama sida waafaqsan barnaamijka kale guriyeynta HUD ee ay daboolen VAWA, ama, hel guri kale.

Ka saarida ku xadgudbaha ama dambiilaha qoyska, HP waa inuu raacaa Faderaalka, Gobolka, iyo nidaamyada ka saarida deegaanka. Si markaas loo kala gooyo heshiiska kirada, HP laga yaabo, laakin loogama baahno inuu, ku weydiiyo waraaqaha ama cadeynta dhacdooyinka rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

### **U guurista Qeyb Kale**

Xiliga codsigaaga, HP waxay kuu ogolaan kartaa inaad u guurtid qeyb kale, sida waafaqsan helitaanka qeybaha kale, iyo weli hayso caawintaada. Si markaas loo ansixiyo codsiga, HP wuxuu ku weydiin karaa inaad bixisid waraaqaha aad u codsaneysid inaad guurtid sababtoo ah dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka. Haddii codsiga loo codsado wareejinta degdega, bixiyaha guriga wuxuu ku weydiin karaa inaad xareysid codsi qoran ama buuxi foomka halka aad ka cadeysay inaad buuxisid sharuuda wareejinta degdega sida waafaqsan VAWA. Sharuuda waa:

**(1) Waxaad tahay dhibane rabshada qoyska, taariiqda rabshada, weerarka galmada, ama dabagalka.** Haddii aad tahay bixiyaha guriga ee aan marhore laheyn waraaqaha cadaynaaya in aad tahay dhibanaha rabshada, rabshada

shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, bixiyahaaga guri wuxuu ku weydiin karaa waraaqo noocaas ah, sida lagu sharaxay qeybta waraaqaha hoose.

**(2)Waxaad si muujin ah u codsatay wareejinta degdega ah.**Bixiyahaaga guri wuxuu dooran karaa inuu kaaga baahdo inaad xareysid foomka, ama wuxuu ogolaan karaa codsi kaloo qoran ama hadal ah.

**(3)Waxaad si macquul ah u aaminsantrahay in laguugu hanjabay waxyeelo dhow ee rabshad dheeraad ah haddii aad ku hartid qeybta hadeer.**Tani waxay la micna tahay inaad sabab haysid oo aad ku baqdid haddii aadan helin wareejinta aad kula dhibaatoon laheyd rabshada mustaqbalka xiggo.

**AMA**

**Aad tahay dhibanaha weerarka galmada oo weerarka ay ku dhacday dhismooyinka inta lagu jiro muddada kaleendarka 90-maalmo ka hor inta aadan codsan wareejinta.**Haddii aad tahay dhibanaha weerarka galmada, kadib ay dheertahay u qalmida wareejinta degdega sababtoo ah waxaad si macquul ah u aaminsantahay in laguugu hanjabay waxyeelo dhow ee rabshad dheeraad ah haddii aad ku hartid qeybtaada, waxaad u qalmi kartaa wareejinta degdega ah haddii weerarka galmada ay ku dhacday dhismooyinka dhismahaan ee aad ka raadineysid wareejintaada, iyo in weerarka uu ku dhacay gudaha muddada kaleendarka 90-maalin ka hor inta aadan si muujin ah u codsanin wareejinta.

HP waxay joogteyneysaa codsiyada qarsoodiga ee wareejinta degdega ah ee dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, iyo goobta guurida walba ee dhibanayaasha noocaas iyo qoysaskooda.

Qorshaha wareejinta degdega HP wuxuu bixiyaa warbixin dheeraad, iyo HP waa inay sameysaa koobiga qorshaha wareejintaan degdega ah ee adiga lagu heli karo haddii aad weydiisid inaad aragtid.

**Qorista Inaad Tahay ama Aad Aheyd Dhibanaha Rabshada Qoyska, Rabshada Shukaansiga, Weerarka Galmada ama Dabagalka**

HP waxay awoodaan, laakin loogama baahno inay, ku weydiyaan inaad siisid waraaqaha lagu “cadeynayo” inaad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka. Codsiga noocaas ah ee HP waa inuu qoraal ahaan ahaadaa, iyo HP waa inay ku siisaa ugu yaraan 14 maalmo ganacsi (Sabtida, Axada, iyo fasaxyada Faderaalka lama xisaabiyo) ka bilow maalinta aad heshid codsiga lagu bixinayo waraaqaha. HP waxaa laga yaabaa, laakin ma ahan, kordhinta dhammaadka waqtiga ee gudbinta waraaqaha markii la codsado.

Waxaad u siin kartaa HP mid ka mid ah kuwa xiggo sida waraaqo. Waa dooqaaga midkee ka mid ah kuwa xiggo ayaa loo gudbinayaa haddii HP ku weydiiso inaad siisid waraaqaha ee aad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

- Foomka cadeynta dhameystiran ee ay ansixiyeen HUD ee adiga ay kula siiyeen HP ogeysiintaan, waraaqahaas dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka. Foomka wuxuu ku weydiinayaa magacaaga, taariiqda, waqtiga, iyo goobta dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, iyo sharaxaada dhacdada. Foomka cadeynta waxay bixisaa oo ay ku jiraan magaca xadgudbaha ama dambiilaha haddii magaca xadgudbaha ama dambiilaha lagaranayo oo ay badbaado tahay in la sheego.

- Diiwaanka hay'ada fullinta sharciga Faderaalka, Gobolka, qabiilka, dhulka, ama deegaanka, maxkamada, ama hay'ada maamulka ee qortaa dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka. Tusaalaha diiwaano noocaas ah waxaa ku jiro wargelinada booliska, amarada illaalada, iyo amarada xakameynta, ee kuwa kale ka mid ah.
- Bayaanka, ah inaad saxiixdo, oo ay la jiraan saxiixa shaqaalaha, hay'ada, ama tabarucaha bixiyaha adeega dhibanaha, qareenka, xirfadlaha caafimaad ama xirfadlaha caafimaadka maskaxda (isku jir ah, "xirfadlaha") aad ka raadisay caawinta lagu sheegayo rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, ama saameynada xadgudubka, oo ay la jiraan xirfadlaha adiga aad dooratay ee lagu sheegayosida waafaqsan ciqaabta been sheegida ee isaga ama iyada aaminsanyahay in dhacdada ama dhacdooyinka rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka waa sababaha illaalada.
- Bayaan kaloo kale ama cadeynta ee HP ay la ogolaatay inaad ogolaato.

Haddii aad ku guuldareysatid ama aad diidid inaad sheegtid mid ka mid ah waraaqahaan ee gudaha 14 maalmood ganacsi ah, HP looma baahno inay ku siiso illaalada ku jirto ogeysiintaan.

Haddii HP hesho cadeyn qilaafeyso ee in dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka way ka go'neyd (sida foomamka cadeynta ee ka imaanayo labo xubnood ama ka badan ee qoyska oo midkood sheeganayo inuu dhibane yahay oo magacaabayo hal codsi ama ka badan xubnaha qoyska ee codsanayo sida ku xadgudbaha ama dambiilaha), HP waxay xaq u leedahay inay codsato inaad sheegtid waraaqaha xisbiga sadexaad ee gudaha sodon maalmood 30 oo maalmaha kaleendarka si markaas loo xaliyo qilaafka. Haddii

aad ku guuldareysatid ama aad diidid inaad bixisid waraaqaha xisbiga sadexaad halka ay ka jirto cadeynta qilaafeyso, HP looma baahno inay ku siiso illaalada ku jirto ogeysiintaan.

### **Qarsoodi ah**

HP waa inay joogteysaa qarsoodiga ama warbixin walba ee aad sheegtay ee ku saabsan ku dhaqanka xaquuqdaada sida waafaqsan VAWA, oo ay ku jiraan xaqiiqda ah inaad ku dhaqmeysid xaquuqahaaga sida waafaqsan VAWA.

HP waa inaysan u ogolaan shaqsi walba ee maamulayo caawinta ama adeegyada kale oo matalaada HP (tusaale ahaan, shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha) si ay u galaan warbixinta qarsoodiga ahillaa sababaha sida gaarka ah ugu yeero shaqsiyaadkaan inay galaan warbixintaan sida waafaqsan sharciga Faderaalka, Gobolka, deegaanka ee quseeyo.

HP waa inaysan galin warbixintaada goob walboo xog ee la wadaago ama u siideynin warbixintaada hay'ad ama shaqi kale. HP, si kastaba, waxay siideyn karaan warbixinta la sheegay haddii:

- Aad bixisid ogolaansho qoran HP ee lagu siideynayo warbixinta ee ku saleysan xadeynta waqtiga.
- HP waxay u baahantahay inay isticmaasho warbixinta ka saarida ama nidaamka ka joojinta, sida looga saarayo ku xadgudbahaaga ama dambiilaha ama ka joojinta ku xadgudbahaaga ama dambiilaha caawinta sida waafaqsan barnaamijkaan.
- Sharciga wuxuu u baahanyahay HP ama milkiilaha gurigaaga inuu siidaayo warbixinta.

VAWA ma xadeyso waajibaadka HP ee lagu sharfayo amarada maxkamada ee ku saabsan dhismaha ama lagu maamulayo. Tani waxaa ku jiro amarada loo sameeyay in lagu ilaaliyo dhibanaha iyo amarada ka kala goynayo dhismaha xubnaha qoyska ee xaaladaha halka qoyska kala go'o.

### **Sababaha Kireystaha U qalma Xaquuqaha Daganaanshaha sida waafaqsan VAWA Waa Laga Saari Karaa ama Caawinta Waa La Joojin Karaan**

Waa lagaa saari karaa iyo caawintaada waxaa loo joojin karaa ku xadguudbka heshiiska guriga oo dhab ah ama lagu celiyay ee aan la xiriirin rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka la sameeyay ee adiga kaa soo horjeedo. Si kastaba, HP ma celin karto kireystaha ahaa dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ee qaab sharciyada la dijiyay ee loo baahanyahay badelkii ay quseyso kireystayaasha ee aan aheyn dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Illaalada lagu sharaxay ogeysiintaan way quseyn kartaa, oo waalagaa saari karaa iyo caawintaada la joojin karaa, haddii HP ay muujin karto inaysan kaa saareynin ama kaa joojineynin caawintaada waxay muujineysaa halis jirka dhab ah ee:

- 1) Ku dhici karto jadwalka waqti degdega ah, iyo
- 2) Sababi karto dhimasho ama waxyeelo jirka dhab ah ee kireystayaasha kale ama kuwa u shaqeeyo dhismaha.

Haddii HP ay muujin karto kuwa kore, HP waa inay joojisaa kaliya caawintaada ama kaa saartaa haddii aysan jirin tallaabooyinka la qaadi karo ee lagu yareynayo ama lagu baabi'inayo halista.

### **Sharciyada Kale**



VAWA ma badesho sharci walboo Faderaalka, Gobolka, ama deegaanka ee siiso illaalo wanaagsan dhibanayaasha rabashada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka. Waxaad u qalmi kartaa illaalalada guriga dheeraadka ah ee dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka sida waafaqsan sharciyada Faderaalka, sidoo kale sida waafaqsan sharciyada Gobolka iyo deegaanka.

### **Aan Uhogaansaneyn Sharuudaha Ogeysiintaan**

Waxaad soo waregelin kartaa xadgudubyada bixiyaha guriga ee ku daboolan xaquuqahaan oo raadiyaan caawin dheeraad ah, haddii loo baahanyahay, iyada oo lala xiriirayo ama la buuxinayo cabashada **Minneapolis HUD Field Office**.

### **Wixii Warbixin Dheeraad ah**

Waxaad eegi kartaa koobiga xukunka ugu dambeeyo ee HUD VAWA ee **[https://](https://www.federalregister.gov/documents/2016/11/16/2016-25888/violence-against-women-reauthorization-act-of-2013-implementation-in-hud-housing-programs)**

**[www.federalregister.gov/documents/2016/11/16/2016-25888/violence-against-women-reauthorization-act-of-2013-implementation-in-hud-housing-programs](https://www.federalregister.gov/documents/2016/11/16/2016-25888/violence-against-women-reauthorization-act-of-2013-implementation-in-hud-housing-programs)**

Waxaa dheer, HP waa inay sameysaa koobiga sharciyada HUD VAWA ee adiga lagu heli karo haddii aad weydiisid inaad aragtid.

Wixii su'aalo ee la xiriiro VAWA, fadlan la xiriir **the Community Development Department at 507-334-0100**.

Wixii caawin ee la xiriiro xiriirka xadgudubka, waxaad soo wici kartaa Qadka Rabshada Qoyska ee Qaranka oo ah 1-800-799-7233 ama, dadka qaba curyaanimada maqalka, 1-800-787-3224 (TTY). Waxaad sidoo kale la xiriiro kartaa **the Hope Center at [www.hopecentermn.org](http://www.hopecentermn.org) or 507-332-0882 or Ruth's House of Hope at [www.ruthshouseofhope.org](http://www.ruthshouseofhope.org) or 507-334-5043**.

Wixii kireystayaasha ee ah dhibane ama ahaa dhibane ee dabagalka oo raadinayo caawin wuxuu booqan karaa Xarunta Qaranka ee Dhibanayaasha Dambiga Xarunta Illaha Dabagalka ee **<https://www.victimsofcrime.org/our-programs/stalking-resource-center>**.

Wixii caawin ee la xiriiro weerarka galmada, waxaad la xiriiri kartaa **the Hope Center at [www.hopecentermn.org](http://www.hopecentermn.org) or 507-332-0882 or Ruth's House of Hope at [www.ruthshouseofhope.org](http://www.ruthshouseofhope.org) or 507-334-5043.**

Dhibanayaasha dabagalka raadinayo caawinta waxay la xiriiri karaan **the Hope Center at [www.hopecentermn.org](http://www.hopecentermn.org) or 507-332-0882 or Ruth's House of Hope at [www.ruthshouseofhope.org](http://www.ruthshouseofhope.org) or 507-334-5043.**

**Lifaaqa:**Foomka cadeynta HUD-5382

DIWAANGALINTA  
RABSHADA QOYSKA,  
SHUKAANSIGA

TACADIYADDA GALMADA AMA  
UGAARSIGA IYO ISDABA  
MARINTA MAACLUUMAADKA

U.S. Qeybta Guriyaynta  
Iyo Hormarinta Magaalooyinka

OMB Lambarka La ansixiyay. 2577-0286  
Taariikhda uu dhacayo 06/30/2017

**U Jeedada Foomka:** Qodobka sharciga ee Ka hortaga Rabshadaha ka dhanka ah Haweenka (VAWA) waxa uu ka difaacayaa codsabayaasha, kiraystayaasha iyo ka qaybgalayaasha qaar kamid ah barnaamijyadda HUD in laga saaro, loo diido caawinta guriyaynta ama laga joojiyo caawintaasi guriyaynta sababo la xirriiro falalka rabsahadda qoyska, rabshadda jacayl, tacadiyadda galmada, ugaarsiga ka dhanka ah iyaga. Inkastoo magaca sharcigani, difaaca VAWA uu yahay mid diyaar u ah dhibanayaasha rabshadaha qoyska, rabshadaha ka dhasha isla gooni ahaanshada, tacadiyadda galmada iyo ugaarsiga, looma eegayo jinsiga qofka, kala saarida jinsiyaadka ama u kala eexashada jinsiga.

**Isticmaalka Foomkani Ee Aan Waajibka Ahayn :** Haddii aad ka codsanaysid qof ku siiyo guriyaynta magan galyada VAWA, waxaa laga yaabaa in uu ku siiyo codsi qoraal ah kaasi oo lagaa doonaayo in aad keentid cadeymo ku saabsan dhacda ama dhacdooyinka rabshadaha qoyska ,rabshadaha la xidhiidho iska kali noqoshada tacadiyadda galmada iyo u gaarsiga.

Ka jawaabida codsigani adiga ama shaqsi adiga ku matalo ayaa laga yaabaa inuu dhammaystiro foomkani aan waajibka ahayn una soo bandhigo qofka ku siinaayo guriyaynta ama waa suurtagal in aad adiga soo gudbisid mid kamid ah cadeymaha qofka saddexaad ee hoos ku xusan.

(1) Dukumeentiga aad adiga saxiixday, shirkadda ama qofka aad u shaqaysid ama qof iskiisa isu soo saaray inuu u adeego dhibanaha waxa uuna noqon karaa sharciyaqaan, mas'uul caafimaad, ama mas'uul caafimaad ee dhanka miirka ka shaqeeyo (si guud, "aqoonyahan") kaasi oo aad ka codsatay caawimaad la xidhiidho rabshadaha qoyska, rabshadaha isla gooni noqoshada, tacadiyadda, ama u gaarsiga ama waxyeeladda tacadiyadeed. Dukumeentiga waxaa waajib ah inuu noqdo mid qeexaayo ciqaabta la xidhiidho been sheegida in aqoonyahanka uu aaminsanyahay dhacda ama dhacdooyinka rabshadda qoyska, rabshadaha isla gooni noqoshada, tacadiyadda galmada ama u gaarsiga, kuwaasi oo dhacay lehna astaamaha "rabsahadaha qoyska," "rabshadaha isla gooni ahaanshada," "tacadiyadda galmada," ama, "u gaarsiga" ee sharciga HUD ee 24 CFR 5.2003.

(2) Diiwaanka dawlad goboleedka, dawladda, qabiilka, xuduuda waaxda meelmarinta sharciga degaanka, maxkamadda ama waaxda maamulka; am

(3) Isaga oo raali ah qofka bixiyo guriyaynta, qoraalka ama cadeymaha kale ee uu bixiyo codsadaha ama kireystaha.

**Soo Bandhigga Cadeymaha:** xilliga la soo bandhigaayo cadaymaha 14 maalmood oo ay shaqo jirto ah laga bilaabo taariikhda aad heshid codsiga qoraalka ah ee kaaga yimaada qofka ku siinaayo guriyaynta, adiga oo waydiinayo qofka ku siinaayo guriyaynta cadeymaha dhacdooyinka rabshadda qoyska, shukaansiga, tacadiyadda galmada ama u gaarsiga. Qofka Ku Siiyo Guriyaynta Waxaa Laga Yaabaa, Balse Looma Baahno, In Uu Kordhiyo Xilliga Waqtiga La Soo Bandhigaayo Cadeymaha, Haddii Aad U Codsatid Kordhinta Xiliga Waqtiga. Haddii Macluumaadka La Codsaday Aan Lagu Soo Gudbin 14 Maalmood Gudahood Laga Bilaabo Marka Aad Heshid Cadeymaha Codsiga , Ama Kordhinta Taariikhda Uu Bixiyo Qofka Ku Siiyo Guriyaynta, Qofka Kusiiyo Guriyaynta Uma Baahno In u

Kusiiyo Difaaca VAWA. Qaybinta Ama Bixinta Foomkani Uma Adeegaayo In Uu Yahay Aqoonsiga Codsiga Qoraaleed.

**Sirta:** Dhammaan macluumaadka lagu siiyo oo uu ku siiyo qofka ku siiyo guriyaynta oo kusaabsan dhacdooyinka ama dhacda, rabshadda qoyska, rabshadda shukaansiga, tacadiyadda galmada, ugaarsiga waa in loo xifdiyaa sir ahaan iyo in macluumaadkaasi aan lagu wadaagin meel u furan dadka oo dhan. Shaqaalaha qofka ku siiyo guriyaynta waa ka mamnuuc inay macluumaadkani helaan marka laga reebo in lagu siin waayo ama lagu diido macluumaadkani ee magan galyada VAWA iyo shaqaalaha noocaasi ah waa in aadan ciddna ama shirkadan siin macluumaadka, marka laga reebo in bixinta macluumaadkaasi uu yahay mid: 1) lagula heshiiyay adiga ama aad kula heshiisay qof qoraal in uu jiro waqti xadidan oo la bixin karo; ii) looga baahanyahay in loo isticmaalo ka saarida socoto ama dhagaysi la xiriiro joojinta caawinta; iii) haddi kale uu loo baahanyahay sharciga la adeegsan karo.

**Waxaa dhamaystiri karo dhibanaha ama qof matalo dhibanaha rabshada qoyska ,rabshada shukaansiga ,tacadiyada galmada iyo ugaarsiga:**

1. Taariikhda dhibanaha laga helay codsiga qoraalka ah: \_\_\_\_\_
2. Magaca dhibanaha: \_\_\_\_\_
3. Magacaagga (Haddii uu ka badalanyahay kan dhibanaha): \_\_\_\_\_
4. Magaca ama magacyada xubnaha ama xubinta qoyska kale ee ku qoran heshiiska: \_\_\_\_\_
5. Degaanka dhibanaha: \_\_\_\_\_
6. Magaca danbiilaha eedeysan (haddii la garanayo iyo in si dhibaato la aan ah loo shaacin karo)  
\_\_\_\_\_
7. Xidhiidhka danbiilaha eedeysan iyo dhibanaha \_\_\_\_\_
8. Taariikhda iyo waqtiga dhacdada ama dhacdooyinka (Haddii la garanayo): \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_
10. Goobta uu shilka ka dhacay: \_\_\_\_\_

Adiga oo isticmaalayo luuqadaada, sharxaad ka bixi shilka:

<p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p>
---

Tani waa xaqiijin in macluumaadka ku xusan foomkani uu yahay mid run ah oo sax ah in ay gaarsiisantahay aqoontayda iyo xasuustayda iyo in shaqsiga magaciisa uu ku xusanyahay qeybta labaad ee sare uu yahay ama uu ahaaba dhibane rabshada qoyska, rabshada isla gooni ahaanshada, tacadiyada

galmada iyo u gaarsiga. Waxa aan qirayaa in soo bandhigida macluumaad qalad ah uu burburinayo sax ahaanshada barnaamijka una horseedi karo in la diido soo bandhigida, joojinta caawimaada ama iska saarida guriga.

Saxiixa

la saxiixay (Taariikhda)

**Caqabadaha wargalinta guud:** Caqabada wargalinta guud ee soo uruurinta macluumaadkani waxaa lagu qiyaasayaa isku celcelin in ay qaadnayso hal saac celinta halkii jawaabba. Tani waxaa ka mid ah waqtiga soo aruurinta, dib u eegista, iyo gudbinta macluumaadka. Maluumaadka la bixiyay waxa isticmaalaya qofka bixinaya guriyaynta si uu u codsado diiwangalinta in codsadaha ama kireystaha in uu yahay dhibanaha rabshada qoyska, rabshadda la xidhiidho shukaansiga, tacadiyadda galmada ama ugaarsiga. Macluumaadku waxa uu ku gawracanyahay in uu ahaado mid la xifdisan sida ay qabto shuruudhada VAWA. Hay'adani waxa laga yaabaa in aysan soo aruurin macluumaadka adigana in lagaaga baahdo in aad dhammaystirto foomkani, marka laga reebo inuu cadeynayo maamulka xafiiska rasmiga ah ee u dammbeyay iyo lambarka maamulka miisaaniyada